



Ginny Hansmann
Deputy Superintendent
Teaching & Learning
Beaverton School District 48J
16550 SW Merlo Road
Beaverton, OR 97003
503.356.4328 • Fax: 503.356.4415
ginny_hansmann@beaverton.k12.or.us
Administrative Assistant: Sally Hunt



Maarso 27, 2020

Qoysaska Qaaliga ah ee Iskuulada Degmada Beaverton,

Waxaan rajeynayaa in dhammaantiin aad fiican tiihin sidoo kale aad ka gudbi kartaan waqtigan adag. Waxaan rabnaa inaad ogaataan inaan ka mahadcelineyno dulqaadkiina inta lagu jiro musiibadan COVID-19 ee sida dhaqsaha ah isusoo taraysa. Iyadoo la fulinayo Amarka Fulinta ee gudoomiye Brown, dhamaan iskuulada waa ka xirnaan doonaan ardayda iyo bulshada illaa iyo Abril 28, 2020. Haddii wax isbedelaan oo fasaxan la kordhiyo, waxaan sameyn doonaa isbadalo aan laga maarmiin si aan u hubinno inaan ardayda siinayno fursado si looga hortago waxbarasho la'aan. Xiliga mudo kordhinta xiritaanka iskuulada, Waaxda Waxbarashada Oregon (ODE) waxay kula talineysaa iskuulada inay ku dhiirigeliyaan ardayda iyo qoysaska inay ka qeyb qaataan barashada aan rasmiga aheyn ama dheeraadka ah ayagoo la adeegsanayo waxyaalaha ku jiro internet-ka iyo kuwa aan ku jirin.

Muddadii xiritaanka, Degmadu waxay ardayda siineysay fursad waxbarasho dheeri ah iyo taageero waxbarasho. Wuxaana la hirgaliyay Qorshaha Waxbarista Fog (qeyti'i1) ee Iskuulada Degmada Beaverton (BSD) si loogu daboolo tobanka maal mood ee ugu horreeya ee xiritaanka dugsiga (Maarso 16 - Abril 3), marka laga reebo usbuuca loo qorsheeyay fasaxa gu'ga. Markii gudoomiye Brown dheereeyay ilaa April 28, waxaan bilawnay qorshaynta Wajiga 2 ee Qorshaha Waxbarista fog.

Hadafyada Qorshaha Wajiga 2 ee Waxbarida Fog waa:

- Isku xirida macalimiinta iyo ardayda si ay u joogteeyaa cilaqaadka iskana taageeraan shucuurka badqabka bulsho inta lagu jiro waqtigan adag. Samaqabka ardayda iyo shaqaalaha ayaa ah ahmiyadeena ugu sareysa.
- Bixinta fursado waxbarasho oo dheeriga ah oo la xiriirto manhajka fasalka caadiga ah si looga hortago in barashdu go'do.
- Siinta fursado lagu kasbado dhibcaha ardayda loodka kore ee dugsiga sare si ay ugu qalin jabiyaan waqtigooda.
- Hubsinta in ardayda oo dhami fursad u helaan fursadaha waxbarasho.
- Siinta tababar iyo ku caawinta macallimiinta iyo shaqaalaha maamulka aalado iyo farsamooyin si ay si guul leh ugu fududeeyaan fursadaha waxbarashada fog.

Waan fahamsanahay oo ognahay in inteeda badan aan ku kala duwan nahay markay noqoto waxa socdo waan qiraynaa, isla markaana waxaan u dejin doonno qorshooyinka horay loogu sii socdo. Hadafkeena qorshaha barashada fog ayaa ah in laga hortago barasho lumid, iyo tan ugu muhiimsan, inaan dib u dhisno xiriirradii aan la laheyn ardayda, kaasoo aasaas u ah howlaheena. Gaar ahaan loodadka hore, waxaan qiraynaa khasaarahay weyn ee dhamaantiin dareentaan, waxaana dooneynaa inaan markale idin xaqiijyo inaan qorsheyneyno inaan soo bandhigno dhamaan fursadaha waxbarasho ee lagama maarmaanka ah si dhamaantiin aad u qalin jebisaan.

Talaadada soo socota, maamulayaasha waxay kala shiri doonnaan shaqaalaha si ay ugala hadlaan faahfaahinta qorshaha barashada fog. Waan ognahay oo waan fahamsanahay in isbedel la sameyn doono, waxaana aaminsanahay in si fiican looga hadlo in isbadaladaan ay ku kala duwanaan doonaan iskuulada, fasalada iyo ardayda qaar. Walaaca waa nawada haayaa si isku mid ah dhamaanteen, laakiin waxaan ku faraxsanahay, sida aan u hubo inaad, dib isugu xirantaan shaqaalaha! Tani kulligeen waan ku wadajirnaa! Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan qorshaha saxda ah waa la soo sheegi doonaa isbuuca dambe markay shaqaaluhu fursad u heleen inay kulmaan.

Waad ku mahadsantiihun dulqaadkiina iyo taageeradiina habkan cusub ee waxbarista ardaydadeena!

Daacadnimo,

Ginny Hansmann
Ku Xigeenka Kormeeraha Guud ee Barista & Barashada
Iskuulada Degmada Beaverton